



Baaq

Tr: 13-04-2020

Si looga hortago Caabuqaan dilaaga ah ee Coronavirus (Covid-19), Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxay ku baaqaysaa:

1. In il gaar ah lagu hayo dadka dadkeena ugu nugul sida: **Barakacayaasha & Qaxootiga soo guryo-noqday**.Xaaladda ay dadka barakacayaasa ahi ku nool yihiin waa duruuf aad u adag sida iyagoo aan lahayn **hooy** rasmi ah iyo iyagoo ka kooban **qoysas** aad u badan. Sidoo kale, waxaa jira in goobaha ay ku nool yihiin ay yihiin meelo aad cariiri u ah oo is dulsaaran, taasi oo keeni karta, Ilaahey ha inaga hayee, in haddii uu qof ka mid ah barakacayaasha uu haleelo cudurkani uu si fudud ugu faafin karo bulshada barakacayaasha ah dhexdeeda iyo bulshada inteeda kale.
2. In Dowladda Federaalka Soomaaliya, dowladaha xubnaha ka ah DFS iyo Maamulka Gobolka Banaadir in si wax ku ool ah ay ugu darsadaan qorshaha looga hortagaayo Covid-19 dadka barakacayaasha ah. **Waxaase xusid** mudan in dadka barakacayaasha ah ay u soo shaqo doontaan goobaha ay deggan yihiin bulshada dhaqaale ahaan ladan si ay u helaan nolol maalmeedkooda, taasuna waa arrin sahli karta faafidda Covid-19 maadaama ay bulshada inteeda kale ay xiriir shaqo la leeyihiin.Waxaa intaas dheer in iyaguna aysan lahayn awood ay ku karantiilaan qofkii qaba cudurkaasi.

Waxaa in la isweydiiyo mudan sida uu qorshuhu noqon doono haddii Covid-19 uu gaaro goobaha ay degganyihiin dadka barakacayaasha ah.

Shaki kuma jiro in natiijadu nowon doonto mid dhibaato badan sabata. Qaybaha kala duwan oo dowladda iyo bulshada Soomaaliyeed waa in ay ka wada shaqeeyaan sidii looga hortagi lahaa faafidda cudurkan.

Sidaasi awgeed, Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxa ay boorrineynaa in aan sameyno iskaashi xoog badan oo ay ku mideysan yihiin dhammaan bulshada soomaaliyeed si loola diriro loogana hortago cadowgan aan loo jeedin.

Dhammaad

